Biximaha Mar-Kaliya ah

Biximaha mar-kaliya ahi waa Waxbiximo la siiyo shaqsiyaad ama qoysaska la kulma waxyaabaha looga baahan yahay barnaamijka IFS oo leh baahi mar-kaliya ah oo aan hoos iman ilo kale. Adeegyada la siin karo biximaha mar-kaliya ah ee ku saabsan dhismaha, beddelka gaadiidka, ama qalabka sida gaarka loo isticmaalo.

Fuundeynta Xaaladaha Deg-Degga ah

Adeegyada xaaladaha deg-dega ah ayaa ah ka nasashada daryeelka, maarayn anshax ama adeegyada kalkaalinta caafimaad iyada oo ka jawaabeysa mushkilad kaliya, xaalad ama qalqal muddo-gaaban ah.

Adigu waxaad u-qalantaa in laguu eego siinta fuundo mar-kaliya ah ama xaalad deg-deg ah haddii:

- Adiga ayna kuu idmanayn adeegyada barnaamijka IFS.
- Ay baahidu tahay mid lama-huraan u ah caafimaadkaaga iyo badbaadadaada ama daryeel-bixyehaaga; iyo
- Adiga iyo qoyskaagu aydaan lahayn kheyraad aad kula kulantaan baahidan.

Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshadu waxay hagaajin doontaa ammaanka iyo caafimaadka qofka, qoyska iyo beelaha iyada oo bixin doonta hoggaamin oo dhisi doonta kana qayb geli doonta hawl-wadaagid.

Gobolka 1 Woqooyi
1 (800) 462-0624
TTY (509) 568-3038
1611 W. Indiana Ave.
Spokane, WA 99205-4221
Phone (509) 329-2900

Gobolka 1 Koonfur
1 (800) 822-7840
TTY (509) 454-4321
3700 Fruitvale Blvd.
Suite 200
Yakima, WA 98909-2500
Phone (509) 225-4620

Gobolka 2 Woqooyi
1 (800) 788-2053
TTY (360) 714-5002
840 N. Broadway
Bldg. A., Suite 100
Everett, WA 98201-1288
Phone (425) 339-4833

Gobolka 2 Koonfur
1 (800) 314-3296
TTY (206) 720-3325
1700 E. Cherry St. # 200
Seattle, WA 98122
Phone (206) 568- 5700

Gobolka 3 Woqooyi
1 (800) 248-0949
TTY (253) 572-7381
1305 Tacoma Ave. S.
Suite 300
Tacoma, WA 98402
Phone (253) 404-5500

Gobolka 3 Koonfur
1 (800) 339-8227
TTY (360) 586-4719
Point Plaza East
Bldg. 2, 3rd Floor
6860 Capitol Blvd. SE
Olympia, WA 98504-5315
Phone (360) 725-4250

Wixii macluumaad dheeraad ah ka booqo websaydka (DDA):
www.dshs.wa.gov/ddd

Maamulka Naafada Korriinka (Developmental Disabilities Administration)

Barnaamijka Adeegyada Shaqsiga iyo Qoyska (Individual and Family Services Program)

Macluumaadka ku saabsan u-qalmitaanka, marin-u-helka iyo adeegyada

Waa nidaamka DSHS in aan dadka lagu takoorin (shaqaalayn ama adeeg) sabab ah jinsiyad, midab, caqiido, diin, asal ahaan, dookh galmo, da', sinji, jiritaanka naafonimo dareen, caqli ama jir ahaaneed, isticmaalka eey wax haga ama xayawaan uu adeegsado qof naafo ah, ama maqaam mujaahidnimo.

Washington State Department of Social & Health Services
DDA Developmental Disabilities Administration

Developmental Disabilities Administration
P.O. Box 45310
Olympia, WA 98504-5310

DSHS 22-038 SM (Rev. 8/13)

Dul-marka Adeegyada Shaqsiga iyo Qoyska

Barnaamijka Adeegyada Shaqsiga iyo Qoysku (IFS) waa barnaamijka kaliya ee ay lacagtiisa bixiso Maamulka Naafada Korriinka (DDA) oo bixisa adeegyo kala-duwan oo ah sidii looga caawin lahaa qoysaska ahaanshaha iyo deganaanshaha unuga qoys. Kaqaybgalka dhammaan adeegyada DDA waa ikhtiyaari.

Barnaamijka IFS waxa loogu talagalay inuu noqodo ku shuraakow ka dhaxeeya dowladda gobolka iyo qoysasku si ay:

- Iska caawiyaan siday u taageeri lahaayeen qoysaska leh xubin qoys oo u-qalma DDA (Maamulka Naafada Korriinka) kuna nool guriga qoyska;
- U siyaan qoysaska adeegyo kala doorashooyin leh; iyo
- Ugu oggolaadaan inay qoysasku u yeeshaan awood maamul oo tii hore ka badan kheyraadka loo qoondeeyey iyaga.

Qaababka Xeer ee Lagu Qiyaaso U-Qalmitaanka IFS

Adigu waad u-qalantaa in laguu tixgaliyo barnaamijka IFS haddii:

- Adigu aad tahay u-qalme macmiil DDA;
- Adigu aad ku nooshahay guriga qoyskaaga;
- Adigu aad ka qoran tahay Guri DDA iyo Ka-dhaaf Adeegyo ku Saleysan Beesha (HCBS);
- Adigu aad tahay saddex jir ama wixii ka weyn; iyo
- Adigu aadan helin adeeg DDA oo qof qaan-gaar ah ama adeeg meel lagu noolaado ku jira, ama daryeel korriin sharciyeysan.

Marin-u-helka IFS

Adigu waxaad la xiriiri kartaa maareeyaha keeskaaga kheyraad ee DDA si aad u weydiisato Adeegyada barnaamijka IFS. Haddii aad buuxiso shuruudaha uqalmanaanta IFS, waxa lagugu dari liiska codsiga IFS. Adigu waxaad heli doontaa ogeysiin qoraal ah oo oggolaanshaha ama diidmada DDA oo ay la socoto xuquuqdaada dhageysiga maamuleed.

Liiska Codsiga IFS

Liiska codsiga IFS waxa ku jira shaqsiyaadka qoyskooda la nool ee codsaday barnaamijka adeegyada IFS. Haddii ayna jirin maalgelin wakhtiga codsiga, shaqsiyaadka u-qalma ayaa la galiyaa liiska codsiga.

U-Qoondeynta Sannadlaha ahee IFS

Qiimeynta DDA waxa loogu talagalay inay qiyaasto baahida taageerooyin ee dadka qaba naafonimada korriinka oo waxa loo isticmaalaa si loo garto heerka baahidaadu inta u yahay. U-Qoondeynta Sannadlaha IFS waa:

- Heerka 1 Illaa $1,200
- Heerka 2 Illaa $1,800
- Heerka 3 Illaa $2,400
- Heerka 4 Illaa $3,600

Adeegyada la Heli Karo

Nasasho

Nasasho muddo-gaaban oo aan isdabajoog ahayn oo xubin qoys oo daryeel u bixinaya shaqsiyaad hela adeegyada barnaamijka IFS.

Qiimaha kharashka caafimaadka dheeraadka ah ee aan hoos iman adeeg kale

Kharashyada caafimaad ee adigu aad gashay marka marinka loo helay Medicaid-ka ama caymis caafimaad gaar ah, ama marka aadan adigu lahayn caymis caafimaad.

Terabiyada (Bogsiinta)

Terabiyada hoos yimaad barnaamijka IFS ayaa ah:

- Terabiga Jirka
- Terabi Mihnadeed
- Terabiyada Hadalka, Maqalka iyo Luqadda

Beddelaadda Dhismaha ama Gaadiidka

U-beddelaadyada guriga ama baabuurka ee qofku leeyahay sidii loo hubin lahaa caafimaadka, samaha iyo badbaadada macmiilka iyo daryeel-bixiyaha; ama sidii macmiil awood loogu siin lahaa, qofkaas oo sida kale u baahan lahaa agagaar xaddidaad badan leh, in uu waxqabsi yeesho xoriyad badan dhexda gurigooda ama beeshooda.

Qalabka iyo Waxyaabaha la socda

Qalab caafimaadka loogu baahan yahay iyo waxyaabaha la socda ee loogu talagalay inay ka caawiso dadka kordhinta ama haynta kartidooda, iyo inay qabsadaan hawlahooda maalin nololeed.

Cuntada iyo dharka gaarka ah

Foormulooyinka iyo cuntooyin sida gaar ah loo diyaariyay oo u qoro, kuna taliyey cilmi-yaqaanka xirfadda arrinta u leh ee ku habboon iyo markay u dhigan tahay 50 ahaan boqolkiiba boqol ama wixii ka badan kaaloriga qofku u qaato.

Dhar aan-xakmayn qofka oo loogu talagalay naafonimada jirka, dhar u adkaysta xirashada badan ama waxyaabaha cagaha la gashado oo si gaar loogu talagalay oo u qoray, kuna taliyey cilmi-yaqaanka xirfadda arrinta u leh.

La-bixinta Adeegyada Caafimaad iyo Bogsiinta

Ujrooyinka go'an (Fixed fees) ee dadka rukumsada qorshe caafimaad waa inay wax bixiyaan si ay u istcimaalaan adeegyo gaar ah oo ah caafimaadka ama bogsiin leh, hoosna yimaad qorshaha. Adeegyadan ayaa ah inay u gartaan xirfad-yaqaannada daryeel-caafimaad in loogu baahan yahay caafimaadka.

Gaadiidka

Dib-u-siinta bixiyaha marka gaadiidka loogu baahdo marin-u-helidda adeegga IFS.

Tababbaritaanka iyo la-talinta

Taageero xirfad-yaqaanimo ayaa la siiyaa qoysasku inay si ka wanaagsan ula kulmaan baahida gaarka ee shaqsiga.

Taageero Anshax

Horumarinta iyo hirgalinta barnaamijyada isticmaala hababka anshaxa toosan si loo taageero dadka leh anshaxa dhibaatada badan.

Waxabarsho Waalid/Walaal

Fasal tababara oo ah mawduucyada la xiriira waalidiinta iyo ilmaha walaalaha ah ee leh xubno qoys oo leh naafo garasho.

Fursadaha Madadaalada

Waxqabyada wakhti-dhaafiska ah ee laga yaabo inay helaan macaamiisha u-qalama ee ay ka midka yihiin xerooyinka xagaaga, waxqabyada YMCA, socdaallada maalinta, xubin ka-noqoshada kooxa madani, naadiyada, fasallada farsamada, waxqabyada isboortiga ee laga helo beeshaada.